FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 14-aad. Garowe November 19, 2012 Lam.11

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

<u>*Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*</u>

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Siyaasadda Barakacayaasha Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 20. ee 19/11/2012, kuna saabsan Siyaasadda Barakacayaasha Puntland.***

*Ref:*- XGGW/DPL/ 115 /2012 Garoowe, Axad Date:- 18/11/2012

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

Garoowe

Ujeeddo:- **Ansixin Siyaasadda Baracayaasha Puntland.**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/ 278/2012 ee November 11, 2012 kuna saabsan Siyaasadda Barakacayaasha Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee 17/11/2012 |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Siyaasadda Baracayaasha Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**



Golaha Wakiillada Speaker of the House of Representatives PUNTLAND STATE

| DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED<br><br>Wasaaradda Arimaha Gudaha, D/Hoose iyo Horumarinta R/Miyiga | | PUNTLAND GOVERNMENT OF SOMALIA<br><br>Ministry of Interior, Local Governance and Pastoral Development |
|---|---|---|

# SIYAASADDA DOWLADDA PUNTLAND EE HAGTA ARIMAHA BARAKACA

**November 18.12012**

**Mahadnaq**

Dawladda Puntland Waxay aqoonsan tahay baahida loo qabo in la dhawro lana ilaaliyo xuquuqda dadka gudaha ku barakacay, isla markaana wax laga qabto baahidooda iyadoo la raacayo qaab isku dubaridan oo waxtar leh.

Siyaasadda hagaysa arrimaha barakacayaasha gudaha (halkan loogu yeerayo "Hagaha") waxaa lagu saleeyay shuruucda arrimaha bini-aadanimada ee caalamiga, shuruucda xuquuqda insaanka iyo shuruucda maxaliga ah ee arrimahaas la xiriira. Hagahani waxay ujeedadiisu tahay in lagu horumariyo marxaladda iyo habka loola dhaqmayo dadka barakacayaasha ah iyadoo kor loo qaadayo wacyigelinta arrimaha la xiriira xuquuqdooda, sidoo kalena la hirgelinayo qaab iyo hab fududaynaya wax ka qabashada baahidooda lana xaqiijinayo isku xir iyo wada shaqayn joogto ah oo dhexmarta dawladda iyo bulshada caalamka ee ku howlan gargaarka bani'aadmanimada/horumarinta.

Wasaaradda Arrimaha gudaha dawladaha hoose iyo horumarinta reer miyiga oo ah mida hadda u xilsaaran arrimaha barakacayaasha waxay u mahadcelinaysaa Madaxweynaha dawladda Puntland oo ambaqaaday horumarinta iyo dejinta siyaasadaan hagaysa arrimaha barakacayaasha, talooyinkii, tusaalooyinkii uu ka bixiyeey dejinta qorshaha siyaasadan lagu hormarinaayey.

Mahad- gaar ah waxaan halkaan uga soo jeedinaynaa Wasaaradda cadaaladda arrimaha diinta iyo dhaqan celinta, Wasaaradda Amniga iyo hub kadhigista, Wasaaradda qorshaynta iyo xiriirka Caalamka iyo wasaaradda warfaafinta dhaqanka iyo wacyigelinta dadweynaha iyo dhammaan wasaaradaha kale, dhammaan wasaaradahaas waxay ku mahadsan yihiin talooyinkoodii qiimaha iyo qaayaha badnaa oo ay ku biiriyeen siyaasadaan intii lagu guda jiray shirkii wasaaradaha dhexdooda ahaa oo lagu dejinayey siyaasadan kaasoo lagu qabtay Garoowe 13-17 November 2011.

Wasaaraddu waxay sidoo kale u mahad celinaysaa UNHCR iyo OCHA taageeradii farsamo iyo dhaqaale oo ay u fidiyeen dejinta siyaasadan. Sidoo kale dhammaan ciddii si toos ah ama si dadban uga qayb-qaadatay dejinta iyo horumarinta siyaasadan lagu hagi doono arrimaha Barakacayaasha ku sugan degaanadda dowladda Puntland.

**Macnayn Erayo.**

Si loo facmo siyaasaddan:

Marka laga hadlayo siyaasada hagaysa arrimaha barakacyaasha gudaha waxaa loola jeedaa:

**Ku Barakacayaasha wadanka gudiisa:**

"....Qof, qofafyaal, ama koox dad ah oo lagu khasbay ama lagu kalifay inay ka baxsadaan guryahoodii ama halkii ay deganaayeen gaar ahaan iyadoo sababtu tahay si ay uga fogaadaan saamaynta colaadaha hubaysan ama xaaladaha kacsan oo keenaya xadgudub xuquuqda bini-aadamka sidoo kale masiibo dabiici ah ama mid bini-aadan sababay, qofkaas ama dadkaasoo aan ka gudbin xuduud caalami ah ee la aqoonsan yahay."

**Barakaca gudaha ah:**

"Waa barakac khasab ah oo aan rabitaan ku iman, daad gurayn ama dib u dajin dad ama koox taasoo aan ka baxsanayn gudaha xuduud caalami ah oo la aqoonsan yahay."

**Barakaca aan loo meel-dayin:**

a) Sal kicin ku salaysan siyaasado isir kala sooc ah ama falal la mid ah oo loola jeedo ama sababa keena bedelaad isir, diin ama qaab-dhismeedka guud ee bulsho.

b) Barakac qof ama dad muwaadiniin ah oo ay keentay colaad hubaysan marka laga reebo haddii nabadgelyada dadweynaha laga shaqaynayo ama arrimo milateri oo sabab macquul ahi ka dambayso si waafaqsan shuruucda samafalka ee caalamiga ah.

c) Barakac si ula kac ah loo isticmaalay qaab dagaal hubaysan ama si kale oo xadgudub ku ah shuruucda samafalka ee caalamiga ah.

d) Barakac ay sababtay qalalaase guud ama xadgudubyo xuquuqda insaanka.

e) Barakac ay keentay natiijo falal dhib gelin ah.

f) Daad gurayn khasab ah xaalado dabiici ah ama bini-aadam keenay ama sababo kale haddii aan daad-guraynta aysan lagama maarmaan u ahayn xaqiijinta, nabadgelyada ama caafimaadka dadka ay saamaysay sida uu qabo sharcigu.

1.2 In la is waafajiyo siyaasada Puntland ee barkacayaasha iyo kuwa lagu qeexay 1998, mabaadii'da lagu hagayo barakacayaasha gudaha ee Qaramada Midoobay iyo arrimaha ka waajibay heshiiskii Kampala ee 2009, iyo sidoo kale shuruucaha sida kan arimaha samafalka caalamiga ah iyo tan xuquuqda insaanka.

1.3 In la dejiyo mabaadii waafaqs.. dastuurka Puntland kuwaasoo xaqiijinaya xuquuqda iyo masuuliyada dastuurka iyo sharcigu u ogolaaday barakacayaasha.

1.4 In kor loo qaado xaaladaha dhaqan-dhaqaale, nabadgelyo iyo horumar joogtaysan dadka barakacayaasha ah iyo kuwa martida loo yahay intaba.

## 2. Arrimo guud

2.1 Qof walba waxaa uu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo in si takrifal ah looga barakiciyo gurigiisa ama meesha uu ku nool yahay.

2.2 Dawladda Puntland iyadoo aqoonsan masuuliyadda ka saaran dhawrista iyo gacansinta dadka barkacayaasha ah oo ku nool dhulka maamulkeeda hoos yimaada, waxay ballan qaadaysaa inay dhawrto, gacansiiso dadka barakacayaasha inta ay awoodeedu u saamaxayso iyadoo wada shaqayn kala yeelanaysaa bulshada caalamka.

2.3 Barakacayaashu waxay xaq u leeyihiin inay ka codsadaan isla markaasna ka helaan dhawris xuquuqeed iyo samafal bini-aadanimo dawaladda puntland. Dawladdu waxay qaadi doontaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dhawrista, gacansiinta barakacayaasha iyadoo isla mar ahaantaana ilaalinaysa nabadgelyadooda.

2.4 Dawladda Puntland waxay xaqiijin doontaa ururiinta xogta muhiimka ah ee khusaysa barakacayaasha iyo faafinta siyaasada lagu hagayo oo loo gudbinayo ururada ay khusayso, si kor loogu qaado wacyigelinta xaaladaha barakaca iyo marxaladda ay ku sugan yihiin.



2059

4.3. Baahida dadka barakacayaasha ah iyo kuwa martigeliyey waa in labadaba la tixgeliyaa marka la dhawrayo xuquuqdooda loona fidinayo samafal.

4.4. Wasaaradda arrimaha Gudaha dawladaha hoose iyo horumarinta reer miyiga waxay masuul ka noqon doontaa isku dubaridka arrimaha la xiriira barakaca g daha waxayna noqon doontaa hay'adda masuulka ka ah arrimaha Barakacayaasha gudaha.

**Wasaaraddu waxay fulin doontaa hawlahaan:**

a) Dhaqan gelinta siyaasada lagu hagayo arrimaha barakacayaasha iyo kormeerida, u kuurgelida iyo qiimaynta horumarka dhaqan gelinta siyaasadan.

b). Inay xaqiijiso in kor loo qaado tayada hawlaha isku dubaridka wada shaqaynta dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladda iyadoo la waafajinayo mas'uuliyadahooda gaarka ah. Wasaaraddu waxay wada shaqayn la samayn doontaa hay'adaha samafalka, dadka barakacayaasha, xubnaha bulshada rayidka ah iyo daneeyayaasha heer gobol, iyo degmo.

c) In la dejiyo xeerarka khuseeyo dadka ku barakacay dalkooda gudahiisa si waafaqsan siyaasada lagu hagayo arrimaha barkacayaasha iyadoo wada shaqayn iyo xiriir lala samaynayo wasaaradaha ay khusayso.

4.5 Mar allaale iyo markii loo arko muhiim, Madaxweynaha Puntland waxaa uu wakiilan doonaa hay'ad takhasus gaar ah u leh oo madax-bannaan, mid maxalli ah iyo mid caalami ahba, inay kormeeraan gudashada waajibaadka xafiisyadda dowladda iyo kuwa aan dawliga ahayn si loo qiimeeyo shaqooyinkooda la xiriira gacan siinta iyo dammaana-qaadka xuquuqaadka dadka wadankooda ku barakacay ay helaan sida waafaqsan Dastuurka iyo Siyaasadda Barakacayaasha.

## 5. Samafalka bini-aadanimada

Dawladda Puntland waxay:

a) Aqoonsan tahay xaqqa ay ururada samafalka iyo Jilayaasha kale ee ku habboon ay u leeyihiin inay gargaar u fidiyaan isla markaasna taageeraan dadka gudaha ku barakacay.

kor u qaadaya xal waara oo ay helaan barakacayaasha, iyo sidoo kale horumarinta arimaha dhaqaalaha bulshada deegaanka loogu yimid.

k) Haddii ay dhacdo in la ogaado isdaba marin lagu sameeyay deeqda bani'aadanimo, Wasaaradda Arimaha Gudaha oo wakiil ka ah dawladda Puntland waxaa ay magacaabaysaa guddi dabagal/baaritaan ku sameeya isdaba marinta la sheegay. Wasaaraddu waxay kaloo qaadi doontaa tallaabooyin waafaqsan dadka ama shaqsiyaadka lagu helo inay si xun u isticmaaleen deeqda.

## 6. Ka Samato Bixinta Tagrifal Barakac

6.1 Dawladda Puntland waxay aqoonsan tahay xaquuqda dumarka, Gabdhaha, raga iyo wiilasha in laga ilaaliyo barakac aan loo meel dayin oo xad gudub ku ah dastuurka puntland, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda insaanka iyo samafalka.

6.2 Xaaladaha ay timaado in aan laga maarmayn barakac, dawlada Puntland waxaa masuuliyad ka saaran tahay inay yarayso saamaynta barakacaasu keeni karo si toos ah ama aan toos ahayn, barakacaasu waa inuusan qaadan waqti ka badan inta duruufta xaaladaasu dalbayso.

6.3 Tallaabooyin gaar ah ayey dawladdu qaadi doontaa si looga ilaaliyo dadka laga tirada badan yahay inay barakacaan, reer miyiga, iyo dadka kale oo si gaar ah ugu tiirsan ama noloshoodu ugu xiran tahay halka ay degan yihiin.

6.4 Dawladda Puntland waxay xaqiijin doontaa in dumarka, gabdhaha ragga iyo wiilasha barakacayaasha ah ay helaan xorriyad dhaq-dhaqaaq iyo doorashada goobta ay degayaan iyo in laga ilaaliyo barakac aan loo meel-dayin.

6.5 Ka hor inta aysan dawladdu qaadan qaraar ku saabsan barakac ama dib u dejin, dawladda Puntland waxay u kuurgeli doontaa dhammaan fursadaha kale ee baajin karo in barakac uu dhaco in la qiimeeyey. Haddii la waayo wax fursad ah oo lagu baajin karo barakaca, waa in la qaataa tallaabo kasta oo lagu yaraynayo raadka uu reebi karo barakacu. Barakaca la ogol yahay waa inuu ahaadaa oo keliya mid:

a) Loo marayo sida uu qabo sharcigu.

isla markaasna ay ka qayb qaataan qorshaha iyo maamulka meesha loo rarayo.

f) Halka la soo calaamadiyey waa inay tahay meel ku haboon inay waxka tarto nolosha dadka barakacayaasha iyo kuwa martigeliyey iyadoo la tixgelinayo suurtagalnimada fursadaha nolosha iyo arrimaha kale e bulshada nolosheeda lagama maarmaanka u ah.

g) Inta aan la rarin barakacayaasha waa in goobta dhulka loo rarayo loo diyaariyay qorshe.

h) Geedigu waa inuu u dhacaa si la ilaalinayo xuquuqda bini-aadanimo, nabadgelyada iyo sharafta dadka barakacu saamaynayo iyo kuwa martida loo yahay labadaba.

i) in la hubiyo in halka dadka loo rarayo nabadgelyadeeda si dadka barakacayaasha ay ugu noolaadaan si farxad leh oo xuquuqdooda dhawraysa isla markaasna aan faquuq lahayn.

j) Hannaanka geedi-socodka rarista khasabka ahi waa inay kormeeraan hay'ado madax-bannaan.

k) Dhammaan hannaanka geedi-socodka raridu waa in ay kormeertaa Wasaaradda Arimaha Gudaha oo matalaysa Dawladda Puntland, sidoo kale waa in laga qayb geliyaa wakiillo ka socda beesha caalamka.

## 8. Illaalinta/dhawrsita iyo gacansiinta ka hor iyo inta lagu gudo jiro barakaca.

8.1 Dawladda Puntland waxay xushmaynaysaa isla markaasna dhawraysaa xaqqa barakacayaasha Dumarka, gabdhaha, raga iyo wiilashu u leeyahiin nolol iyo sharaf jireed, maskaxeed iyo niyadeed iyo xaqa ay leeyahiin inay helaan xorriyad, nabadgelyo si waafaqsan dastuurka Puntland, shuruucda caalamiga ah ee samafalka iyo tan xuquuqal insaanka, waxay:-

a) Dhawraysaa xaqa lama taabtaanka ah ee barakacayaashu u leeyihiin nolol si waafaqsan sharciga.

b) Ka ilaalinaysaa dumarka, gabdhaha, raga iyo wiilasha barakacayaasha ah weerar ama fal kale oo qalalaase ama wixii

gabdhaha sida daryeelka caafimaadka asaasiga u ah taranka, iyo talooyinka ku habboon oo la siiyo kuwa ka samatabaxa shaqaaqooyinka lidka ku ah dumarka.

**13. Waxbarashada.**

13.1 Dawladda Puntland waxay aqoonsan tahay xaqa gabdhaha iyo wiilasha barakacyaasha ah u leeyihiin inay helaan waxbarasho asaasi ah si waafaqsan dastuurka puntland, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda insaanka iyo shuruucda caalamiga ah ee samafalka bini-aadanimada, waxay:-

a) Xaqiijinaysaa xaqa gabdhaha iyo wiilashu u leeyihiin si siman inay u helaan waxbarasho lacag la'aan ah si caddaalad ah oo la mid ah sida ay u helaan bulshada martida loo yahay.

b) Waxay tirtiraysaa caqabadaha maamul oo sida aan macquulka ahayn ama faquuqa ku salaysan u xadidaya inay gabdhaha iyo wiilasha barkacayaasha ahi helaan xuquuqdooda waxbarasho.

**14. Mulkiyadda iyo hanti yeelashada.**

14.1 Dawladda Puntland waxay xushmayaynaysaa isla markaasna dhawraysaa xaqa barakacayaasha dumarka, gabdhaha, ragga iyo wiilashu u leeyihiin inay hanti yeeshaan si waafaqsan dastuurka dalka, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee samafalka bini-aadanimada, waxay:-

a) Xaqiijin doontaa inaan qofna si aan loo meel deyin looga qaado hantidiisa;

b) Waxay aqoonsan tahay xaqa barakacayaashu u leeyihiin in laga caawiyo inay helaan hantidoodii ka luntay iyo sidoo kale in la dhawro, loo soo celiyo ama loo magdhabo hantidii ay si sharciga waafaqsan ku waayaan.

**15. Shaqada, hawlaha ganacsiga, iyo xuquuqda shacabnimo.**

15.1 Dawladda puntland waxay xushmaynaysaa isla markaasna dhawraysaa xaqa ay dumarka, gabdhaha, ragga iyo wiilasha barakacayaasha ahi u leeyihiin xuquuq dhaqaale si waafaqsan dastuurka Puntland, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda



2068

insaanka iyo shuruucda caalamiga ah ee samafalka bini-aadanimo, Waxay

a) Aqoon san tahay xaqqa qofku u leeyahay inuu shaqo helo iyo xaqa dhawrista shacabnimo.

b) Qaadaysaa tallaabooyin gaar ah oo lagaga ilaalinayo barakacayaasha faquuq kaga yimaada suuqa shaqada iyo sidoo kale inay fursad u helaan xuquuqdooda bulshanimo.

c) Dawladda Puntland gacan siinaysaa barakacayaasha si ay u kasbadaan noloshooda, kobcinaysaa xirfadda aqoontooda si ay uga qayb galaan horumarka degaan, u helaan kana qayb qaataan hawlaha nabadaynta. Barakacayaashu waxay xaqq u leeyihiin inay shaqo helaan, dowladda Puntland waa inay fududaysaa in barakacayaasha lagu daro xoogga wax soosaar ee bulshada.

**16. Xuquuqda ka qaybgalka.**

16.1 Dawladda Puntland waxay xushmaynaysaa isla markaasna dhawraysaa xuquuqda ka qaybgal ee ay dumarka, gabdhaha, ragga iyo wiilasha barakacayaasha ahi u leeyihiin inay ka qayb qaataan go'aan gaarista arimahooda nolol, dhaqan-dhaqaale iyo ka go'aan gaarista arimaha khuseeya danahooda sida uu qabo dastuurka Puntland, shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda insaanka iyo shuruucda caalamiga ah ee samafalka ah bini-aadanimo.

**17. Xalka waara.**

17.1. Mabaadii'da guud ee soo socota ayaa saldhig u ah oo xalka waarana ku xiran yahay:

a) Helista xalka waara waa mid ku imaanaya si tartiib tartiib ah oo inta badan ku timaada geedi-socodka waqtiga fog.

b) Baahida, rabitaanka, iyo xuquuqda barakacayaasha ayaa leh mudnaanta isla markaasna lagu salaynayaa hawlaha la xiriira xalka waara.

c) Xalka waara waxaa la gaaraa marka barakacayaasha baahidooda gaarka ahi ay dhamaato, baahidaas oo lagu xiriiriyey barakacnimadooda.

go'aansadaan inay bulshada ay la nool yihiin ku dhexgalaan, ama helaan degaan meel kale oo wadanka ka mid ah.

f) Waxay aqoonsan tahay isla markaasna ogoshahay doorka dhammaystirka ah ee ururada caalamiga ah iyo jilayaasha kale ee ku habboon doorkaaso waxayna fursad deg dega ah oo hor istaag lahayn siinaysaa in barakacayaashu helaan xal waara.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**